Mabaadi’da Saldhiga u ah akhlaaqiyaadka mihnadda qareennimda

Haddii alle idmo, waxaan isku dayi doonna in aan halkaan ku xusno 7 mabda’a oo saldhig u ah akhlaaqiyaadka Mihnadda qareennimada todobadaas oo kala ah:-

1- Madaxbanaanida qareenka
2- Ikhlaas iyo daacadnimo
3- Xifdinta sirta macaamilka
4- Awoodda iyo kartida gudashada waajibaadka qareennimo
5- Ka fogaashaha danaha iska horimaanaaya
6- Ka shaqaynta danaha Macaamilka (**best interest of client**)
7- Ka fogaashaha isxayasiinta ka badbadiska ah

Waxaan si kooban u sharaxi doonnaa mid kasta oo ka mid ah mabaadi’daan aan soo xusnay.

Madaxbanaanida qareenka

Kuwa ugu horreaya waajibaadka qareenka waxaa ka mid ah in uu muwakilkiisa si sharciga waafaqsan u difaaco una siiyo talo sharci oo meel mar ah , qareenku si uu waajibkaas u guto waxaa lama huraan ah in uu ka madax-banaan yahay faragelin kasta gaar ahaan faragelinta dadka haaya xilalka, sababtoo ah qareen ka baqaaya faragelin nooc kasta ha ahaatee waajibaddkiisa uma guda karo si madaxbanaan.[1]

[1] Horizone institute: Ethics for lawyers PG 3aad

Qodobka 16aad ee mabaadi'da asaasiga ah ee kaalinta qareennada ee uu guddoosaday golaha guud ee qaramada midoobay 7 september 1990, wuxuu qeexayaa in dawladaha laga doonaayo hubinta in qareennado ay shaqadoodo u gutaan iyaga oo aan ka baqayn cabsigelin, xannibaad, iyo faragelin toona.[2]

Damaanadaha madax-bannanida qareennada

Shuruuc kala duwan ayaa qareennada siinaaysa damaanado kala jad ah si ay u gutaan waajibadkooda qareennimo, damaanadahaas waxay iskugu jiraan kuwa guud oo dowladda laga rabo in ay qareennada u damaanad qaado si ay waajibaadkooda u gutaan iyo damaanado laxiriira dacwadaha asluubta oo ururrada qareennada iyo guddiyada anshaxmarinta laga doonaayo in ay qareennada u damaanad qaadaan si aan iyaga oo waxba galabsan habraac anshaxmarinned oo khaldan loogu hagardaamayn.

Waxaan isku dayi doonna in aan damaanadahaas si kooban u xusno annaga oo ku bilaabi doonno kuwa guud .

Damaanadaha madax-bannanida qareennada ee guud

Dawladda waa in ay qareennada u damaanad qaadaa arrimahaan si ay waajibaadkooda u gutaan:-

- In ay awoodaan gudashada waajibaadkooda mihnadeed si xor ah oo hufan si ay u ilaaliyaan danaha muwakilintooda si waafaqsan shuruucda iyo mabaadi'da akhlaaqda xirfadda ee lawada aqoonsan yahay iyadoo aysan jirin

[2] fiiri qodobka 16aad ee ee mabaadi'da asaasiga ah ee ee Kaalin qareennada oo ay Guddoomeen Golaha Guud ee qaramada Midoobay 7 september 1990

caburin, cabsigelin, carqaladayn iyo faragelin kaga timaado dhanka dawladda.

- In ay awoodaan la kulanka iyo waraysiga muwakilintooda meel kasta oo ay joogaan si xor ah.
- In ay ka madaxbannanaadan hanjabaad la xiriirta in laga qaadaayo tallaab nooc kastaba ha ahaatee iyada oo sababto ay tahay gudashada shaqadooda qareennimo si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka anshaxa.
- In ay dowladdu ilaaliso amnigooda iyo amniga qoysaskooda haddii ay timaado khatar amni oo lid ku ah qareennada.
- Waa in aan qareennada loo qabsan dambiyada ay galaan muwakilintooda.
- Waa in aysan jirin maxkamad ama hay'ad kale oo maamul oo diido aqoonsiga qareenka in uu muwakilkiisa ugu hor matalo.
- Qareennadu waa in ay leeyihiin xasaanad oo aanan loo qabsan difaaca ay ka horjeediyaan maxkamadda horteeda inta dhagaysiga dacwadda lagu jiro.
- Waa in hay'adaha booliska iyo dambi oogistu qareenka u suurtageliyaan in uu arko nuqulna ka helo wax allalla wixii muwakilkiisa lid ku ah.

Dammaanaha ku saabsan anshaxmarinta qareenka iyo dambiyada qareenka loo haysto

Ururrada qareennada, guddiyada anshaxmarinta iyo hay'adaha amnigu waa inay qareenka u damaanad qaadaan arrimaha soo socda:-

1- Ururrada qareennadu waa in ay sameeyaan ama soo saaran xeer anshax oo waafaqsan shuruucda dalka iyo halbeegyada lawada aqoonsan yahay.

2- Ururrada qareennada iyo guddiyada anshaxmarintuba waa in ay dadajiyaan qaadista dacwad asluubeeedka qareenka loo haysto, isla markaana siiyaan fursad uu isku difaaco .
3- Waa in cidda anshaxmarinta samaynaysa ay tahay guddi madaxbanaan,gu'aannadoodana waa in racfaan laga qaada karo
4- Hannanka anshaxmarintu waa in uu noqdaa hanaan hufan oo waafaqsan xeerarka anshaxa iyo mabaadi'da asaasiga ah ee garnaqsiga.
5- Haddii hay'adaha aminigu ay qabtaan qareenka waa in si dhaqso ah loo soo gaarsiiyaa ururka qareennada .[3]

Ikhlaas iyo daacadnimo

Mabaadi'da saldhiga u ah akhlaaqiyaadka xirfadda qareennimada waxaa ka mid ah in qareenku ku sifoobo Ikhlaas iyo Daacadnimo sida uu jiddeynaayo qodobka 59aad ee XHMS, oo dhahaaya (**Waxaa wajib ku ah dhinacyada iyo qareennadoda in ay dacwadda ku maamulaan si ikhlaas ah. Haddi ayna qareennada iyo dhinacyadu ilaalin waajibkaas, garsooraha waxaa u furan in uu isagu u gudbiyo madaxda awoodda u leh edbintooda**).[4]

Qodobka 12aad ee mabaadi'da asaasiga ah ee kaalinta qareennada oo uu guddoomay golaha guud ee qaramada midoobay 7 September 1990, wuxuu

[3] د.كمال عبد الواحد الجوهري, موسعة مقومات التميز الكفاءة في أداء أعمال المحاماة(العلم والطريقة والخبرة)ص 10
[4] fiiri qodobka 59aad ee XHMS

qeexayaa inay qareenka waajib ku tahay ilaalinta iyo joogtaynta ikhlaaska iyo daacadnimada si ay kaalin uga gaystaan xaqiijinta cadaaladda.[5]

Awoodda iyo kartida gudashada waajibaadka qareennimo

Qareenku waa in uu karti u leeyahay guddashada waajibaadka xirfadda si uu dadwaynaha uga difaaco uguna matalo si wanaagsan sharciga , sidoo kale qareenku waa in uusan aqbalin qaddiyadda uusan ka bixi karin, ama uusan waqti u haynin.

Si qareenku u guto waajibaadkiisa waa in uu leeyahay aqoontii iyo xirfaddii looga baahnaa qofka qareenka ah.[6]

Ka fogaashaha danaha iska horimaanaaya (Avoiding a conflict of interest)

Qareenku mar kasta waa in uu ka shaqeeyaa danaha muwakilkiisa sida aan horay u soo sheegnay, si taa la mid ahna waa in uu muwakilkiisa daacad u yahay, labaadaan arrimood waxay waajibinayaan in qareenku uu ka fogaado dano iska hor imaanayaan, oo micnaheedu tahay qareenku waa in uusan matalin laba shaqsi ama qaddiyadood oo danahoodu iska hor imaanayaan**.**

Xeerarka Soomaaliya meelaha lagu xusay arrintaan waxaa ka mid ah qoddobka 15aad ee XHCS, oo qeexaaya in eedaysanayaal dhowr ah ay qabsan karaan hal qareen difaac oo wada difaaco, haddii aanay danahoodu iska hor imaanaynin, tusaale 4 eedaysane oo loo wada heysto hal eed, oo laba ka mid ah ay

[5] fiiri qoddobka 12aad ee mabaadi'da asaasiga ah ee ee Kaalin qareennada oo ay Guddoomeen Golaha Guud ee qaramada Midoobay 7 september 1990

[6] [6] Horizon institute: Ethics for lawyers PG 4aad

qiraal yihiin oo naftooda ku qirayaan isla markaan sheegaya in labada kalene ay dambiga la galeyn, labada eedaysane ee kalana ay dafirsan yihiin in ay dambigaas galeyn, halkaas waxaa ka muuqdo in danaha eedaysanayaashu iska hor imaanayaan sidaa awgeed qareenku waa in uu ka fogaadaa in uu wada matalo eedaysanayaashaas danahoodu iska hor imaanayaa.

Fiiri qodobka 15aad ee XHCS.

Ka shaqaynta danaha macaamilka (Client interest)

Sida uu jiddeynaayo qodobka 3aad ee xeerka qareennada ee 1975, qareenku waa in uu ku dadaalaa ka shaqaynata danaha muwakilkiisa.[7]

Ka fogaashaha isxayasiinta ka badbadiska ah

Qareennada Soomaaliya malaha xeer dhaqameed **(Code of conduct**) oo dhaqangal ah oo ka hadlaaya arrimaha anshaxa xirfadda , si kastaba ha ahaatee marka aan ka hadlayno isxayaysiinta qareenka waxaan ka faa'iidaysa karnaa xeerarka anshaxa ee wadamada kale.

Badanaa xayaysiinta shaqada qareennimada waa la oggolyahay hase ahaatee waa xaddidan yihiin waxayaabaha la xayaysii karo, tusaale xayaysiintu waa in aysan mihnadda u soo jiidin sharaf dhac iyo karaama xumo, sidoo kalana xayaysiintu waa inaysn si khaldan u saamayn qareennada kale, si taa la mid ah xayaysiintu waa in aysan ximbaarsanayn erayo been ah, amba marin-habaabin keeni kara.

[7] fiiri qodobka 3aad ee Xeerka qareennada.

Arrimaha la oggolyahay inay xayaysiinin ku jiraan waxaa ka mid ah:-

- Magaca qareenka
- Magaca shirkadda qareennada
- Cinwaanka iyo goobta xafiisku ku yaallo
- Arrimaha ay shirkadda qareenku ka shaqayso (**Areas of practice**)

In qiimaha xushmadda qareenka lagu sheego xayaysiinta waa arrin ay ku kala duwanyihiin xeerarka anshaxa ee wadamada kala gedisan.[8]

Ugu dambaytii Mabaadi'daan waa mabaadi' Caalami ah oo intabadan wadamada dunidu isku waafaqsan yihiin, qaarkood waxaa lagu xeeriyaa xeerarka Anshaxa qareennada , halka qaarka kalane lagu Xuso xeerar kala duwan oo uu ku jiro kan qareennada.

Qareen: Daahir Maxamed Cali

[8] Horizon institute : ethics for lawyers Bogga 8aad